Siyaasadaha hoose e Mucaaradka

Isbahaysiga Dib-u-xoreynta Somaaliya

Sida muuqata inta badan beelaha Somaalidu way wada taageersan yihiin nidaam dawladeedka federaaliga ah marka laga reebo beelo hosadyada dega koonfurta Mudug & bartamahah Galgaduud, kuwasoo ah beelaha udub dhexaadka u ah ururada mucaaradka.

Siyaasiyiiinta kasoo jeeda beelahaas oo oo intooda badan ah siyaasiyiin caan ku ah dalka kuwaas oo qarkood lagu macaabo colonel Xasan Dahir Aweys, Xuseen Caydiid, Cabdiqaasim Salad Xasan, Yusuf indha'ade, ahna kuwo si weyn uga wal-walsan mustaqbalkooda siyaasadeed, taasoo ay aaminsan yihiin hadii dalka uu ka dhaqan galo nidaam dawladeed ku salaysan hab federaali ah ayna si buuxda hirgasho dorashooynka degmooyinka inay noqon doonaan dad aan muuqan (minority) kuraas yarna ku yeesha baarlamaanka iyo golaha wasaarada ee mustaqbalka dalku yeelan doono. Sababtoo ah, waxa aan isku dheeli tirneyn oo aan is qaadan Karin midaam siyaasadeedka ay danaynayaan baaxadiisa iyo tirade degaanadooda. Deeganadoodaas oo ah deegaano aan qiyaastii ka badneyn ilaa afar degmo oo ay intooda badan cidleeyeen, xiligan aan lahayn maamulo u gaarah aad moodana inay la dhulsugayaan ilaa iyo inta ay siyasdoodu dhinac isugu badanayso.

Siyaasiyiintan inta badan si dhab ah uma muujiyaan siyaasad ahaan waxa ay dhibsanayaan & dhibaha federaalka uga imanaya oo ay ku diidan yihiin, laakiin waxa ay inta badan bulshada Somaaliyeed & caalamka u muujiyaan waqti kasta baahiyaha guud ee somaalidu qabto sida xoojinta & ku dhaqanka shareecada islaamka iyo dib-u- xoreynta ummada Somaaliyeed, iyagoo isaga marin habaabinaya bulshada & caalamka inta ay dalka uga helayaan dawlad ku dhisaan nidaam u saamixi kara sidii ay madax uga noqon laahayeen degmooyinka dalka oo idil, tasoo ah nidaamyada ay ku shaqeeyaan dawladaha xukunka militariga ama kacaanada diiniga ah ku dhisan.

Ilaa iyo bilowgii 90kii waxa ay ku dhaqaaqayeen talaabooyin ay ku dhul balaarsanayaan iyagoo si xawli ah ugu fidayay deegaamada banaadir, Shabeelada hoose iyo jubooyinka taasoo ay awood ahaan u xilsaareen marxuum Jeneraal Caydiid inuu dalka ka hirgelyo dawlad milatari ah o la mida dawladii uu madaxda ka ahaa Marxuum Maxamed siyaad Bare, taasoo akhirkii hirgeliweyday dhiba badan iyo colaad badana usoo jiiday beel ahaa.

Talaabadoodi xigtayna waxay ahayd asaasidii nidaamkii ku salaysnaa kacaanka diiniga ah oo ula muuqday miday diin ahaan ku hanan karaan degaamo badan iyadoo talaabadaasi uu dhaqaalo weyn ku bixiyay Mudane Cabdiqaasim salad Xasan mudadi uu madaxweynaha ka ahaa dawladii Carta, isagoo la kaashanayay colonel Xasan Daahir Aweys ay u sameeyeen maamulo isku muunad ah laga bilaabo Afgoye ilaa Kismayo oo ay madax ka ahayeen Cirfo, Indhacade, dhuxlow..iyo kuwa kaloo badan.

Talaabadoodii sedexaadna waa midi lagu aasaasay Midowgi Maxkamadaha Islaamka iyo golihii shuurada ee uu madaxda ka ahaa Xasan Daahir Aweys taasoo ahayd mid uu weligii ku taa mayay ahaydna mid laga soo miin guuriyay kacaankii islaamiga ah ee dawlada Iran ee ay xukumaan golaha shuurada ee uu madaxda ka ahaa Aayatu-laahi

Khumayni, isagoo markaas colonel Xasan Daahir isu arkayay inuu noqon doono Aayatulaahigii Soomaaliya, cidaan shuuradu ansixina inaysan dalka madax ka noqon karin sida haatan iiraan haysata. Nasiib daro waxaa ku durduriyay oo burburiyay xoogagi DKMG oo kaashanayay ciidamada Itoobiya.

Talaabadoodii afaraadna waa mida haatan ka socota dalka gudihiisa tasoo ay u xilsaareen xoogaga Al-shabaab & Muqaawamada si ay u wiiqaan una aburaan deganaansho la'aan saamixi weyda in DFKMG ku dhaqaaqi weydo fuilnta ama hirgelinta nidaamka federaaliga ah, iyagoo ka bilaabay inay ugaarsadaan gudoomiyayaasha degmooyinka iyo dadka wax garadka ah ee bulshada wax u sheegi kara, iyo weliba qarxinta goobaha dadka shacabka ay ku badan yihiin iyagoo iclaamiyay dagaalo jihad ah o lagu qaaday ciidamada DFKMG kuwassoo ah dagaalada ilaa xiligan ka socda dalka gudihiisa.

Talaabadoodii shanaadna waa mida lagu aasaasay Isbahaysiga Dib-u-xoreynta Soomaaliya ee uu fadhigiisu yahay Asmara. Isbahaysigan oo ah mid la isugu keenaya xubno aan isku siyaasad dhoweyn laakiin aad mooda inay leeyihiin xiligan cadow qura kasoo ah DFKMG & dawlada Itoobya.

Siyaasiyiinta ku bahowday Isbahaysiga dib-u-xoreynta waxa ay ka kala yimaadeen Midowgii Mxkamadaha, Xubno kasoo carooday barlamaanka & golaha xukuumda DFKMG iyo siyaasiyiin cusub oo u badan bahda qurba joogta, kuwaasoo intooda badan loo balan qaaday jagooyin sare in la siin doono hadii ay ka guulaystaa DFKMG laakiin runtii ah dad lagu meel gaarayo.

Hogaaminta Isbahaysiga waxaa si xeeladaysan loogu doortay xubno soo jiidan kara inta badan bulshada ku sugan dalka gudihiisa & qurba joogta si si tageero dhaqaale iyo mid awoodba loo helo loogana gudbo xiliga adag ee lagu jiro, taaso keentay in hogaanka loo magacaabo Shiikh Shariif Shiikh Axmed ku xigeenana looga dhigo Shariif Xasana, Zakariya Xaaji Cabdi, Jeneraal J. Qaalib iyo Maxamud Axmed Tarsan oo qaar kale oo aan weli la magacaabin laakiin balanqaadyo haysta lagana sii dhigay wakiilada jaaliyadaha.

Qof kastoo waxgarad ahi waxa uu dareemi karaa sida ay isaga ilaaliyeen xiligan inay Isbahaysiga hogaamintiisa qabtaan siyaasiyiintii mucaaradnimada asaaska u ahayd waana su'aal weyn oo u baahan in qofwalbaa jawaabtiisa ka bixiyo.

Sida qorshaysan ee muuqata, marka ay soo dhowaato rajooyin muujinaya qabasoomida wadahadalo dib-u-heshiisiineed oo dhab ah waxaa qaybo kamida madaxda sare ee isbahaysiga ee ay ka mid yahiin Shiikh Shariif, Shariif Xasan, Zakaria Xaaji, Maxamud Axmed Tarsan iyo qaar kaloo badan waxaa loo bixin doonaa magacyo qalafsan sida basaasiin, jookaro meel walba raace, dhuuni-raacyo iyo dambiyo kale oo fara badan oo dusha laga saari doono si loogu muujiyo bulshada dad xun oo aan u qalmin jagada ay hayaan markaas kadibna ay jagooyinkaas isku soo magacaabaan xubnihii is qarinayay ee ku danaysanayay isbahaysiga ee caanka ku ahaa mucaaradnimada, si ay u hantaan jagooyinka sare ee laga heli doono dawlada loo dhanyahay ee la rajaynayo inay Somaaliya ka hir gasho.

Lakiin waxaa dhici karta Sheekh Shariif iyo asxaabtiisu inay lasoo baxaan xeelado siyaasadeed oo u dahsoon oo ay kaga hor tegi karaan mooshinada kusoo wajahan oo aad moodo inay xiligan jaraa'idyada qaar laga bilaabay dacaayado wax loogu dhimayo sumcadooda.

Waxaa Diyaariyay:-

Wadaniyiinta & Aqoonyahanka Somaaliya

somali.intellectuals@gmail.com

Somali Intellectuals Group